



# Jarjarida/Gudniinka Fircooniga ah (Female Genital Mutilation/Cutting)

## Waa maxay Jarjarida/Gudniinka Fircooniga ah?

Female Genital Mutilation/Cutting waa hab ah jarid loo qasday ama bedelida goobta ferjiga dhediga iyadoon aysan jirin sabab caafimaad. Waxay leedahay magacyo badan, oo ay ku jiraan jarida, gudniinka dumarka iyo qaliin dhaqameedka dhediga. Waxyelo buu u leeyahay caafimaadka dumarka wax loo baahan yahayna ma aha.

Haddii adiga ama qof aad taqaano uu khatar ku jiro ka wac boliiska **000**.

Booliiska Australia waa ammaan waana lagu kalsoonaan karaa.

Wixii ah macluumaad iyo tallo bixin qarsoon oo bilaasha wac 1800RESPECT **1800 737 732**.

Haddii aad u baahan tahay turjumaan bilaash ah wac **131 450**

## Australia waxaa laga helayaa caawimaad caafimaad iyo taageero.

Haddii nidaamyadaan midkood ku saameeyey waxaad ka heli kartaa Australia gudaheeda taageero iyo daryeel caafimaad oo bilaash ah. Dhakhaatiir, kalkaaliyayaal, macalimiin iyo aqoon yahano kale oo caafimaad ayaa ku caawin kara.

Haddii aad qorsheynayso inaad ilo dhasho, waxaa laga yaabaa inaad doonto la hadalka dhakhtar, kalkaaliso ama aqoon yahano kale oo caafimaad si aad u hesho taageero dheeraad ah markaad uurka leedahay iyo markaad ilmahaaga dhasho.

## Female Genital Mutilation/Cutting wuxuu ka yahay dembi daran Australia gudaheeda.

Female Genital Mutilation/Cutting waa sharci daro Australia gudaheeda. Tan waxaa ku jira u dirida qof dibeda si nidaamkan loogu sameeyo, ama fududeynta, taageerida ama ku dhiirigelinta qof in tan la sameeyo.

Dadka sameeya dembiyadan waxay ku geli karaan xabsi, haddii ay yihiin nin ama naag.

Haddii uu ku saameeyey mid ka mid ah nidaamyadan, waxaa lagugu dhiirigelinaya inaad caafimaad raadsato lagumana ciqaabi doono marka la raaco sharciga Australia.

## Waxaa jira ilo macluumaad iyo adeegyo kale oo ku caawin kara.

Waxaad ka heli kartaa macluumaad ku saabsan Female Genital Mutilation/Cutting on the **National Education Toolkit for Female Genital Mutilation/Cutting Awareness website** at [www.netfa.com.au](http://www.netfa.com.au).

**1800RESPECT** waa adeega qaranka ee kala talinta xadgudubyada galimada, qalalaasha qoyska iyo guriga (Australia's national sexual assault, family and domestic violence counselling service). Waxay bixisaa macluumaad iyo la talin online ka ah iyo taleefanka ah oo qarsoon bilaashna ah. La-taliyayaashu way ku dhageysan doonaan, kana jawaabi doonaan su'aalaha, waxayna kuu gudbin karaan adeegyada taageero ee kale kuna yaal xaafadaada.

Ka wac **1800 737 732** ama kagal website ka **1800RESPECT** ah [www.1800RESPECT.org.au](http://www.1800RESPECT.org.au).

Haddii adiga, ama qof aad taqaanid, loogu kaxeyey dibeda nidaamkan ama aad u maleynayso inaya khatar ugu jiraan in dibeda looga saaro dalka nidaamkan dartii, wac 24/7 Consular Emergency Centre **1300 555 135** (Australia dhexdeeda) ama **+61 2 6261 3304** (dibeda) ama la xiriir ergayga dibeda ee australia ee kuugu dhow ee **dfat.gov.au**.

## Ma u baahan tahay turjumaan?

Ka wac **Translating and Interpreting Service (TIS) 131 450**. Turjumaan ka socda TIS ayaa kaa caawin kara inaad la hadashid adeegyada kale, si kastaba ha ahaatee TIS ma bixiso la talin. Dhammaan wecitaanadu waa bilaash qarsoon oo gaar ah.